



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDW / 42 /2021

TR. 08/02/2021

UJEEDO:- SUGITAAN DHAXALCOOB, CADEYN TARIKO, QAYIM IYO WAKAALADO.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 08/02/2021, Waxaa Maxkamadda Degmada Wadajir, Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

- 1-) **C/rashiid Cumar Geedi “Gacmo dheere”**, Somali ah, Ku Dhashay C/buur, Sanadkii 1965, Ina Salaado Cismaan Nuur, oo sita W.A.L.17015 D/hoose ee Muqdisho.
- 2-) **C/rashiid Sh.Jaamac Faarax**, Somali ah, Ku Dhashay Garabla, Sanadkii 1975, Ina Ubax Guutaale, oo sita W.A.L.NO.0000618/S/D/hoose ee Muqdisho.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga caddeeyeen in uu geeriyooday Marxuum la oran jiray **MARXUUM CALI MAXAMED MAALIN**, kuna geeriyooday Muqdisho, 2000, Waxay kaloo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in Marxuumka Aabihiis, Hooyadiis iyo Xaaskiisaba ay Ka geeri horeeyeen, Wuxuuna ifka uga tagay oo dhaxlaya 6, Gabdhood, Waxayna kala yihiin sidan soo socota:-

DADKA:-

| | | | | | |
|-------------|-------|----------|-------------|---------------|----------------------|
| 1- Kaaho | Cali | Maxamed | Degan Xamar | Qayim | (Gabadhii Marxuumka) |
| 2- Dahabo | Cali | Maxamed | Degan Xamar | Dhalatay 1955 | (Gabadhii Marxuumka) |
| 3- Xaadsan | Cali | Maxamed | Degan Xamar | Dhalatay 1960 | (Gabadhii Marxuumka) |
| 4- Dhuuxo | Cali | Maxamed | Degan Xamar | Dhalatay 1965 | (Gabadhii Marxuumka) |
| 5- Nadiifo | Cali | Maxamed | Degan Kenya | Dhalatay 1972 | (Gabadhii Marxuumka) |
| 6- Saciido | Cali | Maxamed | Degan UK | Dhalatay 1972 | (Gabadhii Marxuumka) |
| 7- C/qaadir | Aadan | Weheliye | Degan Xamar | Dhashay 1980 | (Casabo) |

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in aysan jirin Cid kale oo Marxuumka dhaxleysa haday noqon laheyd Asal Ama Farac.

HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXUUMKA.

Waxay kaloo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in **MARXUUM CALI MAXAMED MAALIN** uu ifka uga tagay Nus Boos Banaan oo ku yaal Muqdisho (Degmada Yaaqshiid) Lehna **W.L.DH.BB/111/9/2018 Tr.16/01/2018**, iyo **Rasiid No.5509/2018 Tr.16/01/2018**, Kana Soo Wada Baxay D/hoose ee Muqdisho “Ahna Diplicate” Cabirkiisuna dhan yahay (20X10.M) Lootto.I.r. (126-A-) Soohdimihiisuna kala yihiin Bari Dhul dad, Waqooyi Dhul dad, Koofur Jid, Galbeed Dhul dad.


EEG BOGGA LABAAD

MASAWIRADA MARKHAATIYAASHA

C/RASHIID CUMAR GEEDI

&

C/RASHIID SH.JAAMAC FAARAX




MASAWIRADA DHAXALTOOYADA

Dahabo Cali Maxamed



Xaadsan Cali Maxamed



Dhuuxo Cali



C/qaadir Aadan Weheliye



WAKIILKA/ DHAX/ C/kariin Macalin Muuse Maxamed



BOGGA LABAAD

WAKAALADO GAAR AH:

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In Dhaxaltooyada kala ah 1-Saciido Cali Maxamed, 2- Nadiifo Cali Maxamed ay Soo Wakiisheen **C/kariin Macalin Muuse Maxamed**, Sida Ku Cad 1-) **Wakaalad Gaar ah Ref NO.NBDUKBI/1188/2021 Tr.04/02/2021** ana Soo Baxday Nootaayo Banaadir-Danun uuna Saxiixay Dr, Yonis C/raxmaan Maxamuud “Timacadde”, 2-) **Wakaalad Gaar ah Ref No. 21958/21 Tr.30/01/ 2021** Kana Soo Baxday Nootaayo Dayax Laanta Nairobi uuna Saxiixay Dr,Aadan Jimcaale Maxamed, Sidoo kale 1-Kaaho Cali Maxamed, 2-Dahabo Cali Maxamed, 3- **Xaadsan Cali Maxamed** 4-Dhuuxo Cali Maxamed,5-C/qaadir Aadan Weheliye, Waxay Maxkamada Horteeda Ku Wakiisheen **C/kariin Macalin Muuse Maxamed**, una soo wakiisheen dhamaantood in uu u maamuli karo, dhaxalkoob u samayn karo, xafidi karo, gadi karo, Hibeyn Karo, Wareejin Karo, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin Karo, dhisi karo, kireyn karto, ka saari karto, saxiixi karo kaalintooda, una doodi karo una dacwoon karo oo qareen u qaban karo, Maxkamadaha dalka hortooda u matali karo qof waliba qismiga uu ku leeyahay dhamaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen **MARXUUM CALI MAXAMED MAALIN.**

QAYIM.

Waxay maxkamadda Degmada Wadajir Sugeysaa in **Kaaho Cali Maxamed** oo ah Qof dhimirka la, oo aan laheyn Awood Tasaruf, uu Qayim u yahay **C/kariin Macalin Muuse Maxamed**, Wuxuuna u taagan yahay Qayb dhaxleedka ay Ka Heshay Dhaxalka Aabaheyd Marxuum Cali Maxamed Maalin in Qaybtayda in uu gadi Karo, Hibeyn Karo, Wareejin Karo, u Qaadi Karo Qismigeeda, Sida Ku Cad Warqada Qayimka ah, oo ay Qortay Maxkamadda Degmada Wadajir oo Ku lifaaqan Dhaxalkoobkaan.

DAMIINU MAAL

Maxkamadda Horteeda Waxaa Yimid **Axmed Macalin Muuse** Sita W.A.L.4169368318738130, wuxuu Maxkamadda Ka Horcadeeyey in uu Damiinul Maal Buuxa ka yahay, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyaan Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Kuwii Dhabta ahaa,Masuul Buuxana uu Ka Yahay Wixii Ka Yimaada Wakaaladaha Sare Ku Xusan.

EEG BOGGA SADAXAAD

Tell: +25261445601



Email: Max.deg.wadajir@gmail.com

BOGGA SADAXAAD

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1-) C/rashiid Cumar Geedi "Gacmo dheere",

2-) C/rashiid Sh.Jaamac Faarax

=SAXIIXA DHAXALTOOYADDA JOOGTA MUQDISHO=

1-Dahabo Cali Maxamed, 2-Xaadsan Cali Maxamed

iyoo 3-Dhuuxo Cali Maxamed 4-C/qadir

=SAXIIXA DAMIINKA=

Axmed Macalin Muuse

=SAXIIXA WAKIILKA DHAXALTOOYADA=

C/kariin Macalin Muuse Maxamed

SUGITAANKA MAXKAMADDA.


Maxkamadda Markay Aragtay Codsiga Wakiilka dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay Marag furka Markhaatiyaasha, Markay aragtay dukumintiyada Dhulka ee uu Marxuumka ku qoran yahay, Markay Aragtay Wakaaladaha sare ku xusan, Markay Aragtay Warqada Qayimka ee Ku Lifaaqan Halkaan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir Sugeysaa geerida **MARXUUM CALI MAXAMED MAALIN** oo ay dhaxalkiisa leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, Waxay kaloo Maxkamaddu Sugeysaa in C/kariin Macalin Muuse Maxamed, uu Wakiil buuxa u yahay dhamaan dhaxaltooydda, isla markaana uu awood buuxda u leeyahay ku tasarufka Hantida ay ka dhaxleen **MARXUUM CALI MAXAMED MAALIN** ee sare ku xusan, Waana Sugitaan dhaxalkoob, Qayim iyo Wakaalado ansax ah Waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA SARRE MAXKAMADDA.

C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA DEG.WADAJIR.

Dr, Axmed Aadan Faarax "Boot"




DOWLADDA HOOSE
EE MUQDISHO



MUNICIPALITY
OF MOGADISHU

KAARKA AQOONSIGA

Lambar:
17015



Magaca.....: ABDIRASHID
Aabaha.....: OMAR
Awowga.....: GEDI
Naynaas.....: GACMO DHEERE
Goobta
Dhalashada: CEELBUUR
Sanadka.....: 01-Jan-1966
Jinsiyada....: SOOMALI



JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Dowladda Hoose ee Muqdisho

Warqadda Aqoonsiga

LAM. 0000618/s

Magac: Cabdirashiid Sh. Jaamac Faarax

Hooyada: Ubax Guutaale

Ku dhashay: Garabla Sanadka: 1975

Jinsiyada: Soomaali Shaqada: Ganacsade

Xaas ahaan: Xaas Deggan: Muqdisho

Dagmada: Yaaqshiid W.G. ee Q. 612

Joogga: 1.73 cm. Oogada: Siman

Indhaha: Dugul Timaha: Madow

Astaan Gaar ah: Maleh

Taariikhda la sameeyey: 28-6-2001



DOWLADDA HOOSE EE XAMAR

Saxiixa

Duqa Magaaladda

KU XIGANA DUQA EE ARIMANA BULSHADA

Xassan M. Nuur Bidaa





FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA



Summad: MDW 43 /2021

TR. 08/02/2021

UJEEEDO:- CADDEYN U MAGACAABID QAYIM.

Waxaa Maxkamada Horteeda Yimid Maanta oo ay Taariikhdu tahay 08-02-2021 Markhaatiyaasha Kala ah :-

1-) C/rashiid Cumar Geedi “Gacmo dheere”, Somali ah, Ku Dhashay C/buur, Sanadkii 1965, Ina Salaado Cimaan Nuur, oo sita W.A.L.17015 D/hoose ee Muqdisho.

2-) C/rashiid Sh.Jaamac Faarax, Somali ah, Ku Dhashay Garabla, Sanadkii 1975, Ina Ubax Guutaale, oo sita W.A.L.NO.0000618/S/D/hoose ee Muqdisho.

Waxay dhaar Ka dib Maxkamada Ka Hor qireen in Kaaho Cali Maxamed uu Qayim u yahay C/kariin Macalin Muuse Maxamed, oo ah Qof dhimirka la, oo aan laheyn Awood Tasaruf, Wuxuuna u taagan yahay Qayb dhaxleedka ay Ka Heshay Dhaxalka Aabaheyd Marxuum Cali Maxamed Maalin Qayb Dhaxleydkaas oo ah Nus Boos Banaan oo ku yaal Muqdisho (Degmada Yaaqshiid) Lehna W.L.DH.BB/111/9/2018 Tr.16/01/2018, iyo Rasiid No.5509/2018 Tr.16/01/2018, Kana Soo Wada Baxay D/hoose ee Muqdisho “Ahna Diplicate” Cabirkiisuna dhan yahay (20X10.M) Lootto.l.r. (126-A-) Soohdimihiisuna kala yihiin Bari Dhul dad, Waqooyi Dhul dad, Koofur Jid, Galbeed Dhul dad.

in qayb dhaxlaydkaas uu gadi Karo, U qaadi Karo Qismigeeda, Wareejin Karo, iyo Wixii La Mid ah, Sidoo Kale Waxay Labada Markhaati ay Cadeeyeen in Wixii Qiraalkoodaan Ka beenooba ay iyaga Masuul buuxa Ka wada Noqon doonaan insha allah .

= SAXIIXYADA MARKHAATIYAASHA=

C/rashiid Cumar Geedi & C/rashiid Sh.Jaamac Faarax,

= SAXIIXA QIYAMKA=

C/kariin Macalin Muuse Maxamed

Maxkamadu Markey dhageesatay Markhaatiyaasha Sare Ku Xusan
Maxkamadu Markii La Horkeenay Qayimka Gabadha Sare Ku Xusan
Waa Qiyam Ansax ah, waafaqsana shareecadda Islaamka iyo qaanuunka Dalka,
Maxkamadduna waa ka saxiixdey dhinacyada uu khuseeyey,
Waxaana lagu qorey Diiwaanka Maxkamadda.

KAALIYAHA SARRE MAXKAMADDA.

C/risaaq Cali Cabdi “Caabi”

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA DEG.WADAJIR.

Dr, Axmed Aadan Faarax “Boot”

